# Axdiga Qabyo-qoraalka ee Dhallinyarada

Anagoo ah dhallinyarada Somaliland, Puntland iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya waxaan garwaaqsannahay in aan nahay dhalinyartii maantay iyo tan mustaqbalka ummadda. Annaga oo tan maanka ku hayna, waxaan jeclaan lahayn in aan yeelano cod mideysan; hal cod oo laga wada maqlo Axdigan. Waxaan u baahannahay bey'ad dhiirrigelisa oo awood siisa qof kasta oo dhalinyaro ah rag iyo dumarba leh in ay helaan awood, sul-do, wakaalad iyo fursado ay ku yeeshaan kala doorashooyin mirodhal ah kuna saleeyaan noloshooda iyo nolosha dadka kale.

Ayadoo la garawsan yahay awooddii iyo halgankii ay Ururkii Dhalinyarada Soomaaliyeed u soo galeen xorayntii Jamhuuriyadda Soomaaliya 1960kii, haddaanu nahay dhallinyarada Somaliland, Puntland iyo Koonfurta dhexe ee Soomaaliya waxaan rabnaa in aan yeelanno cod mideysan oo aan wax uga qabaneyno culeysyada naga wada haysta in aan ku dhisno wax ay u dhan yihiin bulshada Soomaaliyeed taas oo Soomaali oo idil ay dareemayso qiimeyn iyo awood ay ka hesho.

Anagoo garwaaqsan in aan nahay quwad xoog leh oo waddanka hor-u-dhaqaajin karta si loo wanaajiyo guud ahaan horumarka bini'aadamka, waxna looga qabto culeysyada haysta dhalinyarada Soomaaliyeed ee maanta; anagoo garawsan hadafyada lagu xusay Hadafyada Horumarinta Mileeniyamka (Millennium Development Goals), waxaan meel iska dhignay farqiyadeena kala duwan oo aan isku nimid anagoo rajaynayna in aan hanano mabaa'diida soo socota:

Anagoo ah dhalinyarada Soomaaliyeed waxaan cod middaysan ku caddaynayaa Axdigan awood siinta dhalinyarada iyo dadka Soomaaliyeed ayadoo loo maraayo:

## Isbeddel Siyaasadeed iyo mid Hay'adeed:

- Waxaan ugu baaqaynaa dowladda in ay bilowdo oo hirgeliso siyaasadda dhalinyarada qaranka middeysan oo dhamaystiran taasoo si fiican loo dhexgaliyey siyaasadda iyo barnaamijyada qaranka.
- Waxaan garwaaqsaney baahida loo qabo in la suuliyo takoorka lagu hayo gabdhaha, dumarka dhalinyarada ah si waafaqsan waajibaadyada ku qoran heshiisyada iyo shuruucda caalamiga ah, kuwa heer goboleed iyo kuwa heer qaran ee kala duwan ee xaquuqda dadkaee loogu tala galay in lagu ilaaliyo laguna horumariyo xaquuqda haweenka.
- In la hubiyo in qof kasta oo dhalinyaro ah rag iyo dumarba ay heystaan xuquuqda ay uga qeybgali karaan howlaha go'aan qaadashada ee arrimaha bulshada, siyaasadda, iyo dhaqaalaha ee dadka.
- In la abuuro maal-gelin/santuuqa dhaqaalaha awood-siinta dhalinyarada qaranka oo waara.

## Awood siin Bulsho:

- Waxaan doonaynaa in aan bedelno manhajka oo ka dhigno mid u habboon fursadaha shaqo ee ka jira gudaha, waddaninimada, asluubta qofka, deegaanka is-bedbeddela iyo horumarka shakhsiga ah.
- Qof kasta oo dhalinyaro ah waa in uu xaq u yeeshaa in uu helo waxbarasho tayo leh oo ay ka mid tahay heerarka kala duwan ee waxbarashada madaniga ah.
- In la bixiyo waxbarasho aasaasi ah oo lacag la'aan ah qasabna ah, noocyada kala duwan ee waxbarasha dugsiga sarena laga dhigo

kuwo diyaar ah oo qof kastaa heli karo, ayadoo weliba taxadar gaar ah la siinayo dadka reer miyaga.

- In la bilaabo barnaamijyo deeq waxbarasho oo lagu dhiirigalinayo gelitaanka waxbarashada dugisga hoose ka dib iyo tacliinta sare ee dhallinyarada ugu horreysa aqoonta oo ka soo jeeda bulshada tabaalaysan/dayacan, gaar ahaan gabdhaha da'da yar.
- In la bilaabo xarumo cudurka HIV/AIDS oo wax loogu qabto dadka qaba cudurka ayadoo taxadar gaar ah
- la siinayo carruurta dhalatey iyaga oo qaba cudurka HIV/AIDS iyo agoomaha.
- Waxaan jeclaan lahayn in aan aragno iyada oo la kordhiyey helitaanka daryeel caafimaad tayo leh, la awoodi karo, dadka ku habboon (xarumo caafimaad iyo adeegyaba).
- Waxaan rabnaa in aan xog-ogaal u ahaano tallaabooyinka ka hortaga ee cudurada, gaar ahaan kuwa caamka ah si aan u helno nolol buuxda, caafimaad leh, oo wax-soo-saar leh.
- Waxaan ka fileynaa in daryeel caafimaad bixiyeyaaasha ay qoysaska baraan halista la xiriirta caafimaadka dhalmada Jarjaridda Saxaaaxa Dheddiga (Gudniinka), umulidda aan ammaanka ahayn iyo dhalmada badan.
- Waxaan rajaynaynaa in dhalinyarada miyiga helaan xarumaha caafimaadyada ee wareega iyo adeegyo ku abbaaran hab nololeedkooda iyo baahidooda
- In lagu dhiirigaliyaa dadka ay khusayso (stakeholders) in ay siiyan fursado, sida waxbarasho loo dhan yahay oo ay qayb ka yihiin carruurta iyo dhallinyarada naafada ah.
- Waxaan u baahannahay in aan helno goobo bannaan oo dadka u dhaxeeya kuwaas oo aan si nabad ah ku wada kulmi karno, isku dhexgeli karno kuna wada cayaari karno ayadoo aan loo kala sooceyn lab iyo dheddig.
- Waxaan ka codsanaynaa qoysaska iyo dadka haya talada in ay dhiirigaliyaan cayaaraha, gaar ahaan kuwa qofka ku abuuraya qiyamka sida edebta, tartan caafimaad qaba iyo maskax wax soo saar leh.
- Waxaan rabnaa in aan beddelno fekerka bulshada ay ka qabaan dhalinyarada oo ah in ay yihiin dhibaatooyin u baahan in la xaliyo ah (defucut approach) oo ay u arkaan wakiillo hor u kac leh oo is-beddel horseedaya.
- Waxaan rabnaa in bulshadeenna qoysaskeenna, saaxiibadeen, kuwa siyaasadda dejiya, hay'adaha/wakaaladaha iyo muwaadiniinta -- ay noo arkaan dhalinyaro cusub, fikrad cusub, hal-abuur iyo aragti fog leh, horseedayaal iyo indheergarad.
- Waxaan rabnaa in aan muujinno dulqaad oo aan ixtiraamno dad leh asalo kala duwan (jifo, sinji, qabiil ama hantida ku kala duwan).
- In la suuliyo falal dhaqameedyada liida kaamilnimada jir ahaaneed iyo sharafta haweenka.
- In la isku geeyo hal abuurka dhalinyarada si kor loogu qiyamka dhaqamada iyo caadooyinka degaanka.
- In la aasaaso qaab dhalliyarada qurbaha ku nool ku dhiirrigeliya in ay ka qaybqaataan waxqabadka hormarineed ee dalkii ay asal ahaan ka yimaadeen.
- In kor loo qaado istiraatiijiyadaha yareynta dhibaatooyinka dhallinyarada ku biirtay burcad badeednimo, xag-jir, maandooriyeyaasha la qabatimay iyo noocyo kale oo dabeecado halis ah.

## Awood-siin Dhaqaale:

- Qof kasta oo dhalinyaro ah waxuu xaq u leeyahay in uu helo shaqo faa'iido dhal ah oo leh fursado maciishadeed oo joogto ah.
- In la hubiyo in dadku si sinnaan ah u heli karaan shaqo iyo lacag isku-mid ah oo u dhiganta shaqada isku midka u qabtaan iyo in dadka laga ilaaliyo kala takoorka iyada oo aan loo eegeynin isirka, sinjiga, dheddig-laboodka/jinsiga, naafonimo, diinta, iyo siyaasadda, bulshada, dhaqanka ama dhaqaalaha qofka.

- Qof kasta oo dhalinyaro ah waxaa uu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo ku danaysi dhaqaale iyo in ay qabtaan shaqo waxyeelo ku ah caafimaadka qofka dhalinyarada ah ama horumarkiisa/keeda guud.
- In la kobciyo isku-xirka u dhaxeeya suuqa shaqada iyo waxbarashada iyo hab tababar si loo hubiyo in dhallinyarada loo tababaro meelo fursado shaqo laga helayo ama ku soo kordhayaan.
- In la abuuro siyaasadda dhaqaalaha guud ee shaqadu ugu horayso oo shaqo loogu abuurayo dhalinyarada, gaar ahaan gabdhaha dhallinyarada ah.
- In la dhiirrigeliyo gacansi-abuurista dhallinyarada ayadoo la bilaabayo barnaamij tababar baaxad leh (la bixinayo xirfad nololeed iyo tababar xirfad nolol-raadsi, helidda dayn, fursado qof ku haga iyo macluumaad wanaagsan oo ku saabsan fursadaha suuqa ka jira).
- In la diyaariyo barnaamijyada adeegga dhalinyarada qaranka si dheddig-laboodka loogu saleeyo iyo kobcinta xirfadaha gelitaanka suuqa shaqada.
- In la bilaabo barnaamij guud oo bulshada ku saleysan oo ay dhalinyarada qaranka hogaaminayso kaas oo ay ku jiraan xirmo isugu jirta nabadda iyo horumarka labadaba.
- In la dhiirrigeliyo cilmi-baaris lagu sameeyo dhibaatooyinka caamka ah ee haysta dhallinyarada Soomaaliyeed si loo qaabeeyo siyaasadaha yareynta saboolnimada.

## Awood-siin Siyaasadeed:

- In la ballan-qaado in baarlamaaka laga helaa dad matala dhalinyarada.
- In la abuuro kaalin lana xoojiyo meel ay dhalinyarada uga mid noqdaan dadka go'aamada gaara heer qaran, degmo iyo heer dowlad hooseba.
- Qof kasta oo dhalinyaro ah waa in loo xaqiijiyaa xaqa uu si xor ah uu ku muujin karo kuna soo gudbin karo ra'yigiisa ama ra'yigeeda ku saabsan dhammaan arrimaha kala duwan.
- Qof kasta oo dhalinyaro ah waa in uu leeyahay xaquuq uu ku biiri karo urur, xornimada kulan nabadeed iyo xuquuqda macluumaadka.

## Nabad Dhisidda:

- Waxaan jeclaan lahayn in aan ka qayb qaadano oo aan wax la taaban karo ka geysano howlaha nabadda.
- Waxaan jeclaan lahayn in aan bedelno si ay xaaladdu hadda tahay (Status quo), oo aan ka dhaqaaqno xalinta khilaafka muddada gaaban ee dibadda laga wado ee aan u dhaqaaqno qaab lagu beddelayo/dhalan-rogayo khilaafka oo ay Soomali hogaaminayso, ayadoo la qaadanayo wada-hadal wax ku ool ah oo culeysyada jirana si hal-abuur ku dheehan wax looga qabanayo.
- Waxaan rabnaa in aan is-kaashi dhow la yeelanno dhallinyarada qurbo-joogga ah.
- Waxaan rabnaa in la hubiyo ka qaybqaadashada dhalinyarada dhammaan shirarka nabadda iyo dib u heshiisiinta qaranka.
- In dib loo xoojiyo habab dhaqameedka nabad dhisidda.

## Doogaynta Horumarka Dadka (horumar la gaaro iyada oo aan wax loo dhimmin deegaanka):

- In la garawsado danta guud iyo karaanka dhalinyarada ay u leeyihiin in ay difaacaan deegaanka maaddaama ay yihiin dadkii dhaxli lahaa deegaanka.
- In la taageero ururada dhalinyarada in ay abaabulaan barnaamijyo dhiirigwliya ilaalinta deegaanka iyo tamarta sii socon karta sida dhimista qashinka, dib-u-isticmaalid iyada oo la adeegsanayo farsamooyin nadiif ah;
- Waxaan doonaynaa in aan helno xog ku saabsan deegaanka soona saarno ama dib u xoojino qorsheyaalka lagu ilaalinayo deegaanka, loogana hortagayo is-beddelka cimilada gaar ahaan ayadoo la tixgalinayo difaacidda khayraadka sida dhulka (in laga hortago xaalufinta; daaqid badan, qashin-qub aan habbooneyn iyo dhir jaridda) iyo

biyaha (in laga hortago daadka/fatahaadaha, kaluumaysi iyo qashin-qub sharci darro ah iyo ilaalinta khayraadka badda), sii aan u qaadno talaabooyin ku wajahan ilaalinta deegaanka iyo nolol-raadisga.

- In la dhiirrigeliyo isticmaalka tamar lagu dhaliyay hab aan waxyeelleyn khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka lana cusbooneysiin karo ayadoo la bilaabayo ganacsi tamarta kku saabsan oo ay dhalinyaro hogaaminayaaan.
- In la hubiyo ka qaybqaadashada dhalinyarada naqshadda, hirgalinta iyo qiimaynta tamarta la cusboonaysiin karo iyo siyaasadda deegaanka oo ay ku jirto daryeelka/ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah.

**Waxaa ansixiyay wakiiladda dhalinyarada ka kala socotay Somaliland, Puntland iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya intii lagu guda jiray aqoon-isweydaarsigii wadatashiga ahaa ee lagu qabtay Garoowe, Puntland taariikhdu markay ahayd 24 Sebtembar, 2011 waxaana lagu faafiyay gobollada kooxaha dhallinyarada ku baahsan yihiin iyada oo wadatashi loo marayo.**